BUUG-GACMEEDKA SHAQAALAHA

KAABAHA XARUNTA QAYBINTA (DC)

VS&Co
VICTORIA'S SECRET & CO.

Tusmada

Sida Loo Isticmaalo Kaabahan 01

Siyaasadda Shaqo-Xaadirida 01
Mushahaarka Imaanshaha Shaqada 01

Edbin Horusocod Leh 01

U-lebbisadka Guusha 01

Alaabta Shakhsiyeed 02
Sameecadaha Dhagaha ee Lagu Isticmaalo Goobta Shaqada 02

Arimaha Badqabka 02
Barnaamijka Badqabka Shaqaalaha ee Xarunta Qaybinta 02
Wadaxiriirada Badqabka 02
Soo Sheegida Dhaawaca La Xiriira Shaqada iyo Sixida Khatarta 02
Su'aalaha Dhaawaca Shaqada 03
Shaqada Xadidan ee La Heli Karo Kadib Dhaawaca La Xiriira Shaqada 03
Daaweynta Caafimaad 03
Daawooyinka uu Dhakhtarka Qoro 03
Kahortagga Is-goynta/Nabrada 03
Maqasyada Badqabka Leh 03
Qalabka Sumadeynta 03
Badqabka Wax Qaadista/Qambaabulka Shaqo 03
Taxadarrada Guud ee Wax Qaadista 03
Badqabka Mashiinka Alaabta Gudbiyo 03
Saarida Waxyaabaha Xirayo/Kujira Mashiinka iyo Isticmaalka Jaranjarooyinka Inta La Saarayo Waxyaabaha Xirayo Mashiinada 04
Mashiinada Alaabta Qaado ee La Dhereyn Kara 04
Heerarka Qaylada 04
Badqabka Baabuurta Warshadaha ee Wax Lagu Qaado (PIV) 04
Ka Ilaalinta Dhicitaanka ee loogu talagalay PIV-yada iyo Geesaha Sare ee Leh Albaabada Soconayo 05

Daryeelka Guriga 05
Weelka Qashinka/Haamaha Qashinka 05

Gargaarka Koowaad ee Caafimaadka iyo Cudurrada Dhiiga Ka Dhasha 06

Wadaxiriirka Badqabka Kiimikada iyo Khatarta 06
Dhoofinta iyo Qubida 06

Badqabka Korontada 06
Badqabka Uumiyaha 06

Masiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa kale 07
Soo Sheegida Dabka iyo Daad-gureynta Dabka 07
Nalalka Xaaladaha Degdega ah iyo Calaamadaha Goobaha Laga Baxo iyo Demiyeyaasha Dabka 07
Demiyeyaasha Dabka 07
Kahortagga Dabka Ka Kaco Goobta Shaqada 07
Cimilo Aad u Daran 07
Duufaano/Cimilo Aad u Daran 08
Dhul-gariiryada 08

Sida Loo Isticmaalo Kaabahan

Kaabaha Xarunta Qaybinta (DC) waxaa ku jira siyaasado gaar ah, habraacyo, iyo tilmaamo loogu talagalay shaqaalahayaga xarunta qaybinta waana in lala isticmaalo qaybaha kale ee Buug-gacmeedka Shaqaalaha. Shaqaaluhu waa inay dib u eegaan oo ay ogaadaan macluumaadka ku jira qoraalka dheeriga ah iyo sidoo kale Buug-gacmeedka Shaqaalaha ee aasaasiga ah ee ay ku jiraan Siyaasadaha la xiriira dhammaan shaqaalaha.

Siyaasadda Shaqo-Xaadirida

Siyaasadayada shaqo-xaadirida waxay bixisaa qaab habeysan oo iswaafaqsan oo lagu maareeyo waqtiga aan qorsheysneyn ee shaqada ka baxsan, iyadoo la dheelitirayo baahiyada ganacsiga.

Maqnaansho aan la qorsheynin oo aan la ansixin, daahida ama xili hore ka-bixida shaqada ayaa loo diiwaangelin doonaa sidii maqnaansho/daahitaan, xitaa haddii waqtiga fasaxa mushaharka leh (PTO) la isticmaalayo. Dhammaan maqnaanshooyinka/daahitaanada la diiwaangeliyay waxay ku salaysan yihiin maalin shaqo oo la jadwaleeyay. Maalinta shaqo ee loo jadwaleeyay waa tirada saacadaha iyo maalmaha laguu jadwaleeyay inaad shaqeyso, oo ay ku jiraan waqtiyada dheeriga ah. Looma baahna inaad sabab ka bixiso maqnaanshaha ama daahitaanka.

Shaqo-xaadirida waxaa la xisaabiyaa xiliga dib u-eegista sanadlaha ah ee la sameeyo 12 bilood kadib waxaana lagu daraa dib u-eegista waxqabadka sanadlaha ah.

Mushahaarka Imaanshaha Shaqada

Haddii aad imaato shaqada maalin shaqo oo la jadwaleeyay kadibna guriga laguu diro shaqo la'aan awgeed ama duruufo kajira goobta shaqada oo aan caadi ahayn awgood, waxaad heli doontaa mushaharka imaanshaha shaqada. Shaqaalaha aasaasiga ah iyo kuwa xilliyeedka ee shaqeeyo waqti buuxa waxaa la siiyaa lacagta saacadaha dhabta ah ee ay shaqeyeen ama lacagta afar saacadood (mushaharka imaanshaha shaqada), hadba midii badan. Shaqaalaha aasaasiga ah iyo kuwa xilliyeedka ee shaqeeyo waqti bar ah waxaa la siiyaa lacagta saacadaha dhabta ah ee ay shaqeyeen ama lacagta laba saacadood (mushaharka imaanshaha shaqada), hadba midii badan.

Shaqaalaha ikhtiyaarkooda u doorto inay guriga aadaan goor hore waxaa la siin doonaa lacagta saacadaha dhabta ah ee ay shaqeeyaan mana u qalmaan mushaharka imaanshaah shaqada. Shaqaalaha loo diray guriga tallaabo edbin awgeed ama ku xadgudubka siyaasadaha kale awgeed uma qalmaan mushaharka imaanshaha shaqada.

Edbin Horusocod Leh

Waxaa lagaa filayaa inaad gaarto heerarka waxqabadka aadna u dhaqanto si habboon markaad joogto goobta shaqada. Tallaabo sixitaan ah ayaa la qaadi karaa si wax looga qabto dhaqanka ama waxqabadka aan la aqbali karin haddii nidaamyada kale sida tababarka iyo jawaab-ka-bixinta waxqabadka aan lagu guuleysan.

Waxaan edbinta horusocodka leh u adeegsanaa inaan shaqaalaha ka caawino inay fahmaan inay jirto fursad lagu wanaajin kara waxqabadka. Haddii aysan jirin wax ka soo rayn ah ama haddii ay jiraan dhacdooyin soo noqnoqda, ficil sixitaan oo dheeri ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo. Edbinta horusocodka leh waxaa lagu dabaqi karaa nooc kasta oo waxqabad ah, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn Waxsoosaarka iyo Saxsanaanta, Shaqo-xaadirida, Badqabka iyo Wada-shaqaynta.

U-lebbisadka Guusha

Tilmaamahayaga xeerka labiska waxay muhiim u yihiin bixinta mahadho shaqo oo wanaagsan badqabna ah. Shaqaalaha waxaa loo diri karaa guriga iyo/ama waxaa laga qaadi karaa tallaabo edbin oo ay ka mid noqon shaqo-joojinta haddii aysan raacin tilmaamaha xeerka labiska.

Saraawiisha

- Saraawiisha iyo saraawiisha gaagaaban waa inay afka ka laaban yihiin ayna joogaan ugu yaraan kalabarka inta u dhexeeysa qaybta sare ee jilibka iyo qaaybta sare ee bowdada.

Shaatiyada

- Shaatiyada waa in la xirto markasta.
- Looma ogola shaatiyada aan kuleetiga iyo garbaha lahayn, shaatiyada leh qaybiyo banaan, shaatiyada garbaha aan lahayn ee dumarka, shaatiyada dhexda joogo ee caloosha aan fiican u dabooleyn, fanaanadaha garbaha xarkaha ka ah ee dumarka ama kuwa aan xarkaha lahayn.
- Shaatiyada waaweyn waa in hoos laga mariyaa sarwaalka oo aysan garabaha shaatiguna aad uga weynayn gacmaha.

Koodhadhka, Jaakadaha & Funaanadaha Koofiyada Leh

- Jaakadaha iyo fanaanadaha koofiyada leh ee fudud waa la oggol yahay hadiiba aysan khatar ahayn in meel kaa qabsadaan.
- Koodhadhka waxaa la oggol yahay keliya marka laga shaqeynayo jaranjarada biraha ah iyo hadiiba aysan meel kaa qabsaneyn.
- Funaanadaha koofiyada leh lama xiran karo.
- Xarkaha waa in la xiraa ama gudaha la geliyaa oo aysan laalaadin in ka badan saddex inji.

Kabaha

- Kabaha waa inay daboolaan cagta oo dhan.

Daboolada Timaha & Madaxa

- Timaha iyo xariirta waa in laga fogeeyaa wajiga lagana kor mariyaa qoorta.
- Wax kasta oo saaran madaxa shaqaalaha kana soo raaraca oo ka hooseeya garabka waxaa loo baahan yahay in la gooyo, hoos la geliyo ama la iska bixiyo.
- Koofiyadaha ciyaarta baseball ama kuwa dunta ah waa la oggol yahay.

Dahabka iyo xariirta

- Muraayadaha indhaha ee qoraxda laga xirta lama ogola.
- Dahabka soo laalaada kana hooseeya kalxanta waa in hoos laga mariyaa shaatiga.
- Saacadaha iyo jijimooyinka waa inay ku dhegan yihiin curcurka.

Alaabta Shakhsiyeed

Dhammaan boorsooyinka iyo alaabta shaqsiyeed, marka laga reebo kuwa ku jira boorsooyinka wax laga dhex arki kara, waa in lagu kaydiyaa meesha loogu talagalay. Boorsooyinka wax laga dhex arki kara waxaa la dhigan karaa goobta shaqada ee shaqaalaha. Shaqaaluhu waxay codsan karaan boorso wax laga dhex arki kara oo ay shirkaddu siiso si ay u gashtaan alaabta shakhsiyeed. Weelasha qadada waa in lagu keydistaa sanduuq/lookar ama armaajooyinka loogu talagalay ee qolka nasashada.

Sameecadaha Dhagaha ee Lagu Isticmaalo Goobta Shaqada
Marka aysan tababar kujirin, shaqaaluhu waxay isticmaali karaan qalabyada elektirooniga ah ee yaryar ee la qaadan karo ama aaladdaha gacanta ee leh sameecadaha dhagaha/dhega-gashiga markay joogaan aaggaga shaqada ee laga oggol yahay. Kala tasho tababarahaaga ama hogaamiyahaaga si uu kuugu cadeeyo goobahan gaarka ah DC kasta.

Badqabkaaga, iyo badqabka dadka kaleba dartii, isticmaalka samaacadaha waa ka mamnuuc:

- Aaggaga lagu isticmaalo qalab koronto ku shaqeeyo
- Qalab kasta ku oo koronto ku shaqeeya, gawaarida qashinka lagu qaado, ama marka lagu shaqeynayo qalabka nadiifinta
- Marka la joogo/la marayo dariiqyada warshada
- Marka la saaran yahay jaranjarada birta ah ee dejinta
- Inta lagu hawlan yahay qalabka
- Aag kasta halkaasi oo adeegsiga samaacadaha dhagaha ay walaac badqab u keeni karto qof shaqaale ah ama in shaqaale badan
- Marka loo socdo ama laga soo socdo musqulaha, marka loo socdo ama laga soo socdo aagga nasashada, marka loo socdo ama laga soo socdo kafateeriyada ama marka la joogo aaggaga kale ee xaddidan.

Arimaha Badqabka

Barnaamijka Badqabka Shaqaalaha ee Xarunta Qaybinta
Shirkadda waxaa ka go'an inay bixiso jawi shaqo oo badqab ah lehna caafimaad. Waxaan dhammaan goobaha aan ka shaqeyno uga hoggaansanaa sharciyada caafimaadka iyo badqabka ee khuseeya. Shaqaale ahaan, waxaa lagaa filayaa inaad garanayso oo aad raacdo dhammaan habraacyada lagu sharraxay halkan iyo kuwa lagu sharaxay tababar kastoo badqab oo lagu bixiyay goobtaada shaqada. Waa inaad isla markiiba maareeyahaaga usoo sheegtaa wixii ah xaalad shaqo, dhaqamo ama habraacyo kuwaasi oo aan badqab ama caafimaad lahayn.

Ka gaabinta raacida xeerarka iyo habraacyada badqabka waxay sababi kartaa ama gacan ka geysan kartaa dhacdooyinka goobta shaqada taasi oo sababi karta dhaawac, waxyeellada hantida ama qalabka, ama sigasho.

Baadhitaan ayaa lagu samayn doonaa dhammaan dhacdooyinka la xiriira badqabka (tani waxaa ka mid ah waxyeellada hantida iyo sigashada). Faahfaahinta dhacdada iyo tababar xusuusin ah oo ku saabsan sababaha asal ahaan gacanta ka geystay dhacdada badqabka (marka ay khuseyso) ayaa la diiwaangelin doonaa lana qaban doonaa.

Xeerarka Guud ee Badqabka

- Dhaqanka taxaddar la'aanta ah waa mamnuuc.
- Lama oggolo in lagu ordo gudaha DC-yada.
- Kaliya shaqaalaha idman ayaa ka shaqeyn kara korantada iyo nidaamyada korantada.
- Kaliya shaqaalaha ay tababartay ayna shaatiyeysay shirkadda ayaa ka shaqeyn kara gawaarida warshadaha ee tamarta adeegsado (PIV).
- Raac dhammaan habraacyada dami/calaamad saar markii aad nadiifineyso mashiinada iyo qalabyada matoorka ku shaqeeyo.
- Qalabka kahortaga dhicitaanka waa in la xirto markasta oo la joogo meel looga baahan yahay, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, ka shaqeynta qalabka qaado alaabta ama wiishashka; iyo ka shaqeynta aagag loogu talagalay ee DC-yada.
- Kuwa ka reebban: Farsamo yaqaanada xarumaha uma baahna inay xidhaan qalabka kahortaga dhicitaanka marka ay wiishka ku wadaan dhinaca "hoose" ee aagga adeegga ama dukaanka xarumaha.
- Raac xayiraadaha shaqada ee dhakhtarka iyo shaqooyinka ku-meelgaarka ah ee la qoondeeyay si loogu dhaqmo dhammaan xayiraadyada.
- Ka shaqeysii qufulada isjiidka ka hor intaadan galin isjiidka.
- Isticmaal is-goysyada iyo albaabada ay shirkadu sameysay. Ku socoshada, ku istaagida, ku orodka ama fuulid mashiinada alaabta qaado ee socda waa mamnuuc. Kuwa ka reebban: Shaqaalaha adeegyada xarumaha waxaa loo oggol yahay inay marin u helaan mashiinka alaabta qaado si ay ugu sameeyaan dayactir iyagoo isticmaalayo habraacyada daminta iyo calaamadaynta.

Wadaxiriirada Badqabka
Shaqaalaha waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay kormeerahooda kala xiriiraan khataraha kajira goobta shaqada iyaga oo aan ka baqayn aargoosi. Nidaamka wadaxiriirka badqabka ee DC waxaa kamid ah: Boodhadhka, Waraaqa waaweyn iyo bandhigyada elektarooniga ah ee lagu soo dhejiyo meelaha la wadaago, mowduucyada badqabka ee la soo bandhigo inta lagu jiro shirarka bilowga waaxda, tababarka la bixiyo marka shaqaaluhu uu shaqada bilaabayo, shirarka kooxda badqabka iyo in badan oo kale.

Soo Sheegida Dhaawaca La Xiriira Shaqada iyo Sixida Khatarta
Dhammaan dhacdooyinka, dhaawacyada iyo jirrooyinka la xiriira shaqada ee soo gaara shaqaalaha waa in isla markiiba loo soo sheegaa kormeerahaaga iyo Ilaalinta Hantida.

Marka shaqaaluhu uu kujira daryeelka xirfadlayaasha caafimaadka, la xiriir HR Direct (Adeegga Tooska ah ee Waaxda Shaqaalaha). Ogeysiiska degdegga ahi wuxuu muhiim u yahay hubinta in shaqaalaha dhaawaca ah ama xanuunsan uu si haboon oo degdeg ah ku helo daryeelka caafimaad ee lagama maarmaanka u ah.

Shaqaalaha uu soo gaara dhaawac shaqada la xiriira waxay xaq u yeelan karaan Magdhawga Shaqaalaha. Eeg "Macluumaadka Faa'iidooyinka" ee HR Access (Nidaamka Helitaanka Waaxda Shaqaalaha) si aad u heshid talaabooyinka ay tahay in loo qaado markay jiraan dhaawacyo la xiriira shaqada iyo/ama la xiriir HR Direct (eeg qaybta Xiriirada) haddii aad su'aalo qabtid.

Shaqaaluhu waa inay sida ugu dhakhsaha badan kormeeraha ugu soo sheegaan wixii ah khatar badqab, waxyeello hantiyeed (ama sigashooyinka) si markaa sixid/dayactir loo sameeyo loogana hortago inay khataraha sii kordhaan. Baaritaanada badqabku waxay dhacaan bil kasta si loo eego inay jiraan wax khatar jireed ah.

Su'aalaha Dhaawaca Shaqada
Dhammaan shaqaalaha qaba su'aal ku saabsan dhaawaca shaqada la xiriira waa inay HR Direct ka soo wacaan lambarka 1.888.877.4730 oo ay weydiistaan inay la hadlaan Maareeyahooda Kiiska Magdhawga Shaqaalaha.

Shaqada Xadidan ee La Heli Karo Kadib Dhaawaca La Xiriira Shaqada
Haddii shaqaaluhu uu soo gaaray dhaawac shaqada la xiriira, shaqo xaddidan ayaa la heli karaa haddii dhakhtarku uu u qoondeeyey xayiraadyo shaqo oo ku-meelgaar ah oo la qaabili kara.

Daaweynta Caafimaad
Shaqaalaha uu soo gaaray dhaawac shaqada la xiriira ayaa waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay daaweyn ka raadsadaan xarunta caafimaadka ee ku taalo DC 5. Haddii aad tahay shaqaale aan tagi karin rugta caafimaadka, wac kalkaalisada Go'doominta (Coventry) adigoo garaacaya lambarka 1-833-356-2471 si aad usoo sheegto dhaawaca. Waxaa sidoo kale lagu siin doonaa liiska bixiyeyaasha caafimaadka ee aagga joogo.

Daawooyinka uu Dhakhtarka Qoro
Haddii daaweynta dhaawaca shaqada u baahan tahay daawo uu dhakhtarka qoro, daawooyinka ugu horeeya waxaad heli kartaa adigoo myMatrixx (24 saacadood maalintii, 7-da maalmood ee usbuuca) kala xiriiraya lambarka 1.844.276.2515 (koodhka goobta 15405, lambar kooxeedka NZEA). Shaqaalaha dhaawacmay waxaa la weydiin doonaa magaciisa, lambarka sooshiyal sekiyuuritiga, taariikhda dhaawaca iyo magaca shaqo-bixiyaha. Macluumaadka ku saabsan sida loo helo daawooyinka markay kuwa hore dhamaadaan, shaqaaluhu waa inay la xiriiraan cida wax ka beddelayso sheegashooyinkooda.

Kahortagga Is-goynta/Nabrada
Waxyaabo fiiqan/caarad leh ayaa lagu arkaa aaggag badan oo kamid ah goobta shaqada. Haddii aan si haboon wax looga qaban, waxyaabahaani waxay duri karaan dadka. Haddii shay caarad leh uu qof duro, shaygu waa in lagu ridaa weelka loo qoondeeyay waxyaabaha caarada leh, si haboon loogu tuura. Had iyo jeer dhaqo gacmaha kadib markaad taabato shay caarad leh oo sababi kara dhaawac. Kormeerahaaga usoo sheeg dhammaan waxyaabaha caarada leh ee dul saaran mashiinada iyo mashiinka alaabta qaado.

Maqasyada Badqabka Leh
Kaliya isticmaal maqasyada badqabka leh ee la ansaxiyay. Maqasyada badqabka ee dhinaca wax-goynta uu si otomaatig dub ugu noqonayo iyo/ama leh ilaaliyeyaal ayaa la bixiyaa oo loogu talagalay ilaalinta shaqaalaha. Had iyo jeer iska jeedi aalada kana jeedi dadka kale markaad wax jarayso oo hubi in gacmahaaga iyo jirkaagu aysan ku toosneyn dhinaca wax lagu gooyo ee aalada. Beddel aaladaha aan afka lahayn / waxba jarayn dhakhso. Aaladaha la isticmaalay ku rid weelka waxyaabaha caarada leh ee jaalaha ah.

Qalabka Sumadeynta
Haddii aad isticmaaleyso qalabka sumadaynta oo ay cirbad ku durto, nadiifi cirbada iyo meesha ay kaa durtayba. U isticmaal jeermis-dile la ansixiyay si aad cirbada uga disho jeermiska.

Badqabka Wax Qaadista/Qambaabulka Shaqo
Raac farsamooyinka qaadista ee habboon ee hoose si aad uga hortagto dhaawaca dhabarka:

- Ujeedso dhinaca shayga oo cagaha si isdaba joog u dhig shay shayga hortiisa si aad ugu dhawaato shayga ilaa iyo intii suurtogal ah.
- Cagaha kala fogee 6 - 12 inji iyada oo hal cag in yar ka horeyso tan kale.
- Jilbaha laab, oo ha laabin dhabarka.
- Toosi dhabarka oo adkee muruqyada caloosha.
- Isticmaal lugaha iyo jirka hoose si aad u qaadatid shayga.
- Si tartiib ah oo habsami ah lugaha ha u riixaan kor jirka. Dhaqdhaqaaqa wax qaadista waa inuu ahaadaa mid habsami ah oo tartiib ah.
- Cagaha ku taagso oo u rog jirka oo dhan haddii ay tahay in jihada la beddelo marka aad wax qaadayso ama aad wado xamuulka. Ha qalloocin maxoga.
- Markii aad dhulka dhigayso shay culus, hoos u dhig shayga adigoo jilbaha laabayo una oggolow in lugaha iyo jirka hoose ay qabtaan shaqada.

Taxadarrada Guud ee Wax Qaadista

- Yaree masaafada tooska ah ee la rabo in shayga la dhaqaajiyo adigoo isku dayayo inaad shayga u riixdo ama u jiido halka la rabo in loo dhaqaajiyo.
- Xaqiiji in sagxada dhulka ee aagga shaqadu aysan waxbo dul saarneyn.
- Haddii shayga la qaadayaa uu culus yahay ama weyn yahay, caawimaad u raadso shaqaale kale, iyo/ama jajabi shayga si aad u fududeeyso qaadista.
- Dhaqaajinta waxyaabaha culus u isticmaal sagxada wax qaadista, gaari, jeega wax-qaadista ama gaariga warshadeed ee awooda leh.
- Yaree inaad alaabta ku qaado, xambaarto kuna haafto madaxa.
- Lama ansixinin in isticmaalka suunka dhabarka uu faa'iido u leeyahay yareynta dhaawacyada dhabarka. Shirkadda kuma talinayso mana bixiso suumanka dhabarka.
- Marka wax ku qaadayso isjiidka, isticmaal jaranjarooyinka tallaabada yar (2 tallaabo) ah si aad u gaarto heerarka sare. Ha fuulin sanduuqyada/kartoonada heerarka hoose ee isjiidka. Xaqiiji in jaranjarada tallaabada yaryar aysan noqon qatar lagu kufi kara.

Badqabka Mashiinka Alaabta Gudbiyo
Sababta waxay dooniba ha noqotee, marnaba ha galinin gacmaha ama qaybo kale oo jirka ah gudaha mashiinka alaabta qaado (hoosta/gudaha suunka mashiinka alaabta qaado ama inta u dhexeysa is-rogayaasha). Adeegso xarkaha jiidida degdegga ah iyo/ama badhanada joojinta degdegga ah (e-stops) haddii ay jiraan wax dhibaatooyin ah ama wax dhex galaan mashiinka.

Saarida Waxyaabaha Xirayo/Kujira Mashiinka iyo Isticmaalka Jaranjarooyinka Inta La Saarayo Waxyaabaha Xirayo Mashiinada
Kaliya hogaamiyaasha DC ee tababaran ayaa mashiinka ka saari kara waxyaabaha kujira. Markaad soo saarayso waxa mashiinka kujira, dhammaan qaybaha jirkaaga ka fogee mashiinka iyo waxa kujiraba. Tiirar ayaa loo isticmaali karaa in lagu soo saaro waxa xirayo mashiinka. Digtonow, waxa mashiinka kujira ayaa laga yaabaa inuu dhaqaajiyo tiirka marka waxa mashiinka kujira la soo saaro. Haddii jaranjaro loo isticmaalayo soo saarida waxa kujira mashiinka waa inaad ku tababbaran tahay badqabka jaranjarada waana inaad ogaataa in marka la soo saaro waxa kujira mashiinka ay taasi sababi karto dhaqdhaqaaq kedis ah adigoo weli saaran jaranjarada.

Mashiinada Alaabta Qaado ee La Dhereyn Kara
Ka fogow qaybaha soconayo oo soo sheeg wixii ah dhibaatooyin joogsasho oo degdeg ah ama ah kontaroolada kale oo aan sida haboon u shaqeyneynin. Waxaad heli doontaa tababar dheeri ah haddii jagadaadu kaaga baahan yahay inaad adeegsato mashiinada alaabta gudbiyo ee la dheereyn karo. Ha isticmaalin intaadan helin tababarka kahor, fadlan la shaqee kormeerahaaga.

Heerarka Qaylada
Aaggag yar oo ka mid ah Xarumaha Qaybinta ay heerarka qaylada ka sareeysaa heerarka OSHA PEL waxaana loo baahan yahay qalabka ilaaliyo maqalka. Qalabka ilaaliyo maqalka waxaa bixisa shirkadda. Shaqaalaha joogo aaggan waa in lagu tababaraa shuruudaha barnaamijka ilaalinta maqalka. Baaritaanada maqalka ayaa looga baahan yahay shaqaalaha ka shaqeeya aaggagan sanad kasta.

Badqabka Baabuurta Warshadaha ee Wax Lagu Qaado (PIV)
- Baabuurta warshadaha ee tamarta adeegsado (PIV) ayaa loo isticmaalaa in lagu qaado badeecada kartoonada lagu riday/ la raray. Had iyo jeer masaafo kugu filan ka fogow PIV-yada oo iska fiiri oona dhagayso PIV-yada markaad socoto.
- Dareewalada PIV-da waa in si buuxda loogu tababara loona shaatiyeeyo howlgallada/xeerarka PIV-da. Inta lagu gudajiro tababarka PIV-da, tababarka gacan ka-qabashada iyo tababarka fasalka ayaa loo baahan yahay. Shaqaalaha aan PIV-da ku qaadan tababarka qalabyada qaaska ah ee PIV-da waa inaysan ku shaqeyn qalabka.
- Bilowga xili kasta ee shaqada, hawlwadeenka PIV-da waa inuu sameeyaa kormeerka dhammaan waxqabadyada iyo kontaroolada oo uu ku diiwaangeliyaa liiska hubinta ee PIV-da kahor intuusan hawlgalin.
  - Kormeerku waa inuu kujiraa hubinta taayirada, bareegyada, haydarooliga, isteerinka, mitirka dabka batariga, iyo hubinta in batariga uu si adag u xiran yahay.
  - Wixii ah dhibaatooyin waa in isla markiiba loo soo sheegaa Adeegyada Xarumaha.
    - * ***FIIRO GAAR AH:*** Waa la oggol yahay in PIV-da loo kaxeeyo aagga shaqada ee xarunta hadiiba si badqab ah loo kaxeyn karo.
- Darawallada oo dhan waa inay muujiyaan laysinkooda PIV-da markay ku shaqeynayaan PIV-da.
- Kaliya Adeegyada Xarumaha ayaa laga yaabaa inay dab-siiyaan ama badalaan batariyada.

Kahor inta aysan galin isjiidka, hawlwadeenada waa inay:
- Ka shaqeysiyaan qufullada isjiidka ama isticmaalaan reebayaasha cagaha.
- Hubiyaan in nalka nidaamka qufulka joojinta uu cagaar yahay.
- Dhigaan taarikada oo si tartiib ah oo taxaddar leh ugu dul wadaan taarikada.
- Sagxadda isjiidka ka eegaan waxyeello ama meelo daciif ah, haddii ay suurtagal tahay.
- Kala bixiyaan dusha sare ee wiishka ah qaabka la beddeli karo.
- Kaliya jeegaga rarida, wiishashka jaranjarada iyo wiishashka dheelitiran (sit-down lifts) ayaa laga oggol yahay gudaha isjiidka.

Badqabka baabuur kaxaynta:
- Dadka lugeynaya ayaa u xaq leh wadada. Ka jooji ama ka istaag dhammaan dadka lugeynayo.
- Isgoysyada iyo dhamaadka dariiqyada gawaarida, darawalada waa inay gabi ahaanba istaagaan oo ay isticmaalaan hoonka iyo muraayadaha.
- Ku soco xawaare badqab leh hana damin wax ah nidaamyada badqabka ee loogu talagalay in lagu xadido xawaaraha PIV-da.
- Si tartiib ah oo taxaddar leh u leexo.
- Eeg jihada aad u socoto.
- Ka fogow masaafo ah 10-12 fuud waxyaabaha dhegan markaad istaageyso.
- Had iyo jeer u soco jihada leh muuqaalka ugu fiican markaad xamuul wado. Tani waxaa ku jiri kara kaxaynta baabuurka iyadoo biraha wax qaadista ay gadaal kaa jiraan.
- Si joogto ah u eg hareeraha rarka marka aad wadid wiishka dheelitiran oo ay biraha wax qaadista ay kaa horeeyaan aadna u socotid dhinaca hore.
- Dhaafida PIV aad isku jiha u socoteen lama ogola.
- Ka fogow sagxadda qoyan lehna simbiriraxada.
- Iska ilaali inaad dul marto walxaha dhulka yaalo.

Jaranjarooyinka taaga ah:
- Markaad ku socotid dhammaan darajooyinka (jaranjarooyinka taaga ah), oo ay ku jiraan taarikada, dib u foorari rarka oo kor u qaad kaliye ilaa iyo intii lagama maarmaan ah ka kicida sagxada waddada.
- Markaad wado wiishka wax qaadista, rarka iyo biraha wax-qaadista ee PIV-da waa inay ku wajahan yihiin dhinaca kore jaranjarooyinka taaga ah.
- Markaad wadid jeega rarida (PJ), biraha wax qaadista iyo rarka waa inay ku wajahan yihiin dhinaca hoose ee jaranjarooyinka taaga ah.

- Markaad baarkin gareyneyso PIV, hubi in qalabka dabka, jaranjarada laga helo iyo goobaha laga baxo aysan xirnayn.
- Shaqaalaha looga baahan yahay inay isticmaalaan muraayadaha sixida (muraayadaha indhaha) ee loogu talagalay ka shaqeynta baabuurta, sida ku xusan layianka darawalka, waa inay sidoo kale xirtaan muraayadaha sixida markay ku shaqeynayaan PIV-da.
- Si looga fogaado xayndaabyada kore, kor ha u qaadin ama ha hoos dhigin cagyada alaabta lagu qaado (biraha) markaad horey u baxinayso ama gadaal u bixinayso PIV-da.
- Bira wax qaadista hoos u dhig oo u dhawee dhulka, gee kontoroolada heer dhex-dhexaad ama dami (furaha ku dami) markaad ka tagayso PIV-da iyadoon cida ku shaqeyneynin ama haddii aad in ka badan 25 fuud u jirto baabuurka xamuulka.
- Ha u oggolaan qofna inuu fuulo ama ku dul socdo biraha wax qaadista ama uu hoos istaago biraha wax qaadista markay kor u kacsan yihiin.
- Cuntada iyo cabitaanada, oo ay ku jiraan biyaha, mobilada ama aaladaha elektarooniga ah iyo sameecadaha dhagaha waa mamnuuc marka lagu shaqeynayo PIV-da.
  - Waxaa loo oggol yahay raadiyeyaal labo-dhinac ah ee loo adeegsado wada-xiriirka iyo qoryaha iskaan gareeyo mowjadaha raadiyaha.
- Kaga shaqeynta PIV-yada aaggaga xaddidan waa mamnuuc.
- U fariiso qolka hawlwadeenka si haboon oo waafaqsan tallooyinka soo-saaraha.

Tixgelinada rarka/xamuulka:

- Xasili oo si badqab ah u qaabee rarka kahor intaadan dhaqaajin.
- Taxaddar samee markay timaado rarka aan saarneyn bartamah, oo ay ku jiraan:
- Rarka si buuxda culeyska u saarayo birta dheer, dhabarka dambe, ama "wajhada birta wax qaadista".
- Wax ka beddelida wareegga dhinaca, haddii la sameyn karo.
- Kaliya qaad xamuul culeysykiisa uusan ka badneyn culeyska PIV-da ee ku qoran saxanka aqoonsiga.
- PIV-yada lagu rakibay lifaaqyada waa in loo adeegsado sidii PIV-yo qaadayo xamuul nus ah.
  - Hawlwadeenada PIV-da waa inay fahmaan sida lifaaqyada u beddelayo awoodda iyo xasilloonida PIV-da.

Ka Ilaalinta Dhicitaanka ee loogu talagalay PIV-yada iyo Geesaha Sare ee Leh Albaabada Soconayo
Inta aad ku jirtid PIV-da qaaska ah (qaadayaaasha alaabta/rarka, wiishashka, munaaradaha), ilaalinta dhicitaanka ayaa loo baahan yahay waxaadna heli doontaa tababarka loo baahan yahay. Kaliya suumanka kahortaga dhicitaanka, xargaha iyo giiraanta birta ah ee la isku xiro marka meel la fuulayo ee ay bixiso shirkadda ayaa la oggol yahay. Waxyaabaha ilaaliyo dhicitaanka waa in kahor intaan la isticmaalin la baaraa, waana si sax ah loo xirto loona kaydiyo si habboon. Waa in aan la isticmaalin wixii ah qalab waxyeelloobay. Haddii ay jiraan meelo DC-da kamid ah halkaasi oo ay ku taalo sagxad dhinac furan oo ay shaqaaluhu u baahan karaan inay ka helaan alaabta/kartoonada, ilaalinta dhicitaanka ayaa loo baahan karaa - iyadoo kuxiran xaaladda. Kormeerahaaga ayaa kula soo xiriiri doona haddii ilaalinta dhicitaanka looga baahan yahay qaar kamid ah aaggagan.

Daryeelka Guriga

Daryeelka guriga waa qodob muhiim u ah badqabka goobta shaqada. Daryeelka guriga oo liita ayaa sababi kara simbiriiraxo, kufid iyo dhicitaano iyo sidoo kale halis dab iyo khataro ka dhasho walxaha soo dhacayo. Waxba ha ku keydin dhammaan meelaha dadku ku lugeyaan.

Wado kasta oo albaabada ka bixida aadayso waa inay ugu yaraan banaanaataa 28 inji oo ballac ah. Dhammaan meelaha laga baxo waa in had iyo jeer banaanaadaan. Ha xannibin qalabka gurmadka sida dab damiyeyaasha ama alaarmiyada.

U rastee kartoonada, weelasha, iyo wixii kaloo alaab ah qaab badqab ah si aad yareeyso halista waxyaabaha soo dhacaya. Si badqab ah alaabada ugu keydi marfishyada si aad u yareeyso halista waxyaabaha kor ka soo dhacaya. Ha saarin marfishka wax ka badan awooda loogu talagalay. Hubso in dhammaan dermooyinku badqab yihiin oo aysan keenaynin khatar kufid. Ha is-dul saarin dermooyin badan, waxna ha hoos dhigin derinta. Had iyo jeer xiro khaanadaha faylasha iyo armaajooyinka kadib isticmaalka. Isla markiiba nadiifi wixii daato. Soo sheeg wixii ah gees marfish ama qalab caarad leh oo sababi kara dhaawac. Joogtee masaafo ah ugu yaraan 18 inji oo u dhexeysa dusha sare ee badeecadaha keydsan iyo dab damiyayaasha saqafka. Nadiifi qashinka iyo waxyaabaha soo daatay si aad u yareeyso khataraha kufida isla markaana aad u hubiso inaad yareysay waxyaabaha hurin kara wixii dab ah ee yimaado.

Weelka Qashinka/Haamaha Qashinka
Meel ka mid ah jirkaaga ha taabsiin weelka qashinka/haamaha qashinka sababtu waxay dooniba ha noqotee. Sababta waxay dooniba ha noqotee, ha ku dul socon / hana fuulin weelka qashinka/haamaha qashinka adigoo raadsanayo shay la tuuray iyadoon loo qasdin. Sababta waxay dooniba ha noqotee, ha isku dayin inaad weelka qashinka/haamaha qashinka ka soo saarto waxyaabaha xirayo/kujira hana isku dayin inaad dayactirto isku-geeyaha qashinka. Mashiinka ha gelinin tiir, xaaqin, ama shay kale adigoo iskugu dayayo inaad ka soo saarto shay xirayo ama aad riixdo qashinka. La xiriir kormeerahaaga haddii ay jiraan wax dhibaatooyin ah oo la xiriira weelka qashinka/haamaha qashinka.

Gargaarka Koowaad ee Caafimaadka iyo Cudurrada Dhiiga Ka Dhasha

Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah ama uu dhaawac yimaado, kaliya shaqaalaha sida gaarka ah u tababaran, caadiyan kuwa Ilaalinta Hantida, ayaa laga filayaa inay bixiyaan gargaarka koowaad ee caafimaadka ama daaweynta kale oo caafimaad haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah. Shaqaalaha lagma filayo inay Gargaarka Koowaad ee Caafimaadka siiyaan shaqaalaha kale. Haddii aad si shil ahaan ku taabatid dhiig (ama dheecaanada kale ee jirka) ama aad taabatid adigoo samafal sameynayo, isla markiiba ogeysii kormeerahaaga. Ka fogaanshaha inuu ku soo gaara dhiig iyo dheecaanada kale ee jirku waxay yaraynaysaa ubaylah noqoshada cudurrada dhiiga ka dhasha. Isticmaal galoofyada cinjirka ah kadibna si fiican u dhaqo gacmaha. La xiriir kormeerahaaga si aad usoo sheegto xaaladda noocaan ah.

Dheecaanada jireed ee dhammaan dadka waa in loo tixgeliyaa inay ku jiraan waxyaabo waxyeello u keeni kara oo la kala qaadi kara. Maadaama ubaylah noqoshada dheecaanada jireed ay ka dhigan tahay halis infekshin, ka fogow taabashada tooska ah ee dheecaanada jireed. Daaweynta shaqaalaha dhaawacmay ama jirran u daa shaqaalaha Ilaalinta Hantida ee tababaran si fiicana uga ilaashan cudurka ama shaqaalaha caafimaadka.

Wadaxiriirka Badqabka Kiimikada iyo Khatarta

Mararka qaarkood waxay noqoneysaa lagama maarmaan in waxyaabo kiimiko ah lagu isticmaalo goobta shaqada. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan wixii ah kiimikooyin ay ku shaqeynayaan. Tusaalooyinka waxyaabahan waxaa ka mid ah laakiin kuma xaddidno dareeraha lagu nadiifiyo dhulka iyo sagxadda, rinjiga, iyo khadadka iyo khadadka madbacadaha. Dhammaan waxyaabaha nadiifinta / jeermis-dilida waa inay ku jiraan weel ay ku qoran yihiin magacyada waxyaabaha kujira. Had iyo jeer aqri macluumaadka shayga intaadan isticmaalin kahor. Waa inaad ogaataa:

- Sida si badqab ah loogu isticmaalo alaabada.
- Sida taabashada kiimikada ay saameyn ugu yeelan karta badqabka iyo waxa uu yahay qalabka is-ilaalinta shaqsiyadeed (PPE) ee lagu talinayo.
- Habraacyada haboon ee gargaarka koowaad ee caafimaadka.
- Cidda loola xiriirayo wixii ah macluumaad dheeri ah.

Macluumaadka muhiimka ah waxaa laga heli karaa meelo badan, sida:

- Sumadaha alaabta — macluumaadka lagu qoro weelka.
- Baakadaha alaabta — macluumaadka lagu qoro baakada kore.
- Xaashida macluumaadka badqabka (SDS) — xaashiyaha macluumaadka ayaad heli kartaa si aad isla markaaba dib ugu eegto. La xiriir kormeerahaaga ama Shirkadda 3E Company kala xiriir 1.800.451.8346 haddii aad rabto inaad aragto SDS-ta alaabta. SDS-yada waxaa kujira macluumaad ku saabsan khataraha, wixii ah khatar caafimaad ee iman kara, habraacyada gargaarka koowaad ee caafimaadka, wixii ah qalabka is-ilaalinta shakhsiyeed ee loo baahan yahay iyo waxyaabo kale oo badan.
- Soosaaraha badeecada — alaabada macaamiisha badankood waxaa baakadooda ku qoran lambar 800 ka bilaabmayo oo aad wici karto si aad u hesho macluumaadka badqabka ee badeecada.

Soo sheeg wixii dhibaatooyin ah ee ku saabsan waxyaabaha nadiifinta ama kiimikooyinka iyo wixii ah maqaarka/indhaha oo ubaylah noqdo waxyaabaha nadiifinta/jeermis-dilayaasha/kiimikooyinka.

Dhoofinta iyo Qubida

Qaar ka mid ah alaabahayaga waxay u baahan yihiin tixgelin qaas ah oo loogu talagalay dhoofinta ama qubida. "Alaabadan la nidaameeyay," sida buufinada, alaabada udgoon iyo saliida ay ku jirto aalkolada, waa in loola dhaqmaa si waafaqsan qawaaniinta gaarka ah.

Waxaan u hoggaansanahay qawaaniinta qubida iyo dhoofinta. Waa inaad si habboon u tababbaran tahay oo aad u hoggaansantaa shuruudahaan.

Badqabka Korontada

Markaad isticmaaleyso qalabka korontada, xariga iyo fiilada waa inay ahaadaan kuwo aan waxyeello lahayn oo uusan ka maqneyn mid kamid saddexda xarig aanan lahayn fiilooyin koranto oo waxyeello soo gaartay. Qalab kastoo koronto ah ee shoog bixiyo ama soo baylihiyo korontada waa in isla markiiba la soo sheegaa lagana joojiyaa isticmaalka. Ha u isticmaalin fiilooyinka xiriirinta sidii fiilooyin koronto oo joogto ah. Dhinaca hore ee qalabka korontada waa inay masaasfo 3 fuud ah ka banaan tahay si markaa loogu helo marin haboon haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah.

Kaliya xirfadleyaasha korontada ee idman lana siiyay qandaraaska ama shaqaalaha adeegyada xarumada ee aqoonta leh ayaa loo oggol yahay inay shaqo koronto ka qabtaan dhismooyinka ama qalabka shirkadda.

- Had iyo jeer shaqooyinka korontada uga tag shaqaalaha aqoonta u leh.
- Raac dhammaan qawaaniinta badqabka korontada — marnaba ha taaban fiilooyinka banaanka yaala.
- U hogaansan digniinada halista korantada sida sumadaha qalabka, astaamaha, calaamadaha iyo xayndaabyada.
- Marnaba ha u oggolaan in aaladaha ama jaranjarooyinka birta ka sameysan ay taabtaan xargaha korontada ama ilaha tamarta leh.

Badqabka Uumiyaha

Markaad isticmaaleyso uumiyaha, gacanta kale ka fogee dariiqa uumiga oo hubi in xariga iyo fiilada korontada aysan waxyeello lahayn.

Masiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa kale

Soo Sheegida Dabka iyo Daad-gureynta Dabka
La soco jidadka ka daad-gureynta dabka iyo meelaha ay damiyeyaasha dabka iyo alaarmiyada dabka ka yaalaan goobtaada shaqada. Haddii uu dab kaco, isticmaal taleefanka shirkadda si aad u ogeysiiso Xarunta Hawlgallada Degdegga ah (1.800.765.7465). Haddii taleefan aadan isla markaaba heli karin, tag xarunta kuugu dhow ee aaladda qayliso markay jiraan xaaladaha degdega ah oo kici aaladda si ka-jawaabayaasha xaaladaha degdega ah ay u ogaadaan. Xaaladaha qaar, kicinta aaladda ayaa laga yaabaa in aysan isla markaaba bixinin qaylo la maqli karo iyo iftiin; si kastaba ha noqotee, markasta, kicinta aaladda waxay ogeysiis degdeg ah u diraysaa Ilaalinta Hantida, kuwaasi oo baari doona alaarmiga. Marka laga hadlayo xaaladaha caafimaad ee degdega ah, waxaa muhiim ah in la isticmaalo taleefan shirkadeed ama in wax laga soo waco sanaadiiqda Wicitaanada Degdegga ah ee Blue Light si loo xaqiijiyo in habraacyada badqabka ee sugan la hirgeliyo iyo in isla markaana si dhakhso ah oo saxan loo hago shaqaalaha badqabka ee bannaanka jira. Haddii ay qasab tahay inaad lambarka xaaladaha degdega ah ka wacdo taleefanka gacanta, isla markaa kadiba la xiriir HR ama Ilaalinta Hantida si aad u siiso dhammaan faahfaahinta habboon ee dabka. Xitaa haddii dabka la damiyo ama aanan loo baahneyn jawaabta waaxda dabka, la xiriir HR ama Ilaalinta Hantida ee Xarunta si aad ugu sheegto dhacdada.

Nalalka Xaaladaha Degdega ah iyo Calaamadaha Goobaha Laga Baxo iyo Demiyeyaasha Dabka
Dhammaan nalalka xaaladaha degdega ah iyo calaamadaha goobaha laga baxo ayaa la kormeeraa si loo xaqiijiyo inay si sax ah u shaqeynayaan. Waa muhiim inaad la socodsiiso Hogaamiyaha DC haddii aad aragto waxyeello soo gaartay wax kamid ah nalalka xaaladaha degdega ah ama calaamadaha goobaha laga baxo.

Demiyeyaasha Dabka
Damiyeyaasha dabka waxaa laga helaa dhammaan xarumaha waxaana loo isticmaali karaa in lagula dagaallamo dababka yaryar ee marxalad hore marayo. Shaqaalaha marnaba loogama baahna inay isticmaalaan dab-baqtiyaha. Damiyeyaasha dabka ayaa la kormeeraa xilli kadiba si loo xaqiijiyo inay si sax ah u shaqeyn doonaan haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah. Damiyeyaasha dabka waa inay meel banaan ku yaalaan oo aan la xannibin. Waxaa la isticmaalayaa kaliye marka uusan jirin qiiq weyn, marka wax khatar ah uusan kujirin shaqaalaha isticmaalaya damiyaha dabka iyo kaliye marka ay jirto wado banaan oo looga cararo dabka oo aadayso goobaha laga baxo markay jirto xaalad degdeg ah. Marnaba ha isku dayin inaad la dagaallanto dab aan si fudud loogu damin karin hal dab-damiye. La dagaallanka dabka culus u daa waaxda dabka.

Marka ay habboon tahay in la isticmaalo damiyaha dabka, isticmaal
farsamada PASS:

- Soo jiid biinka badqabka oo ka istaag dabka masaafo badqab kuu ah
(ugu yaraan 8 fuud).
- Beegso salka dabka.
- Tuuji gacanka.
- Ku xaaq salka dabka.

Kahortagga Dabka Ka Kaco Goobta Shaqada
Waxaan u hoggaansanaa xeerarka iyo sharciyada dabka ee quseeya. Intaa waxaa dheer, waxaa naga go'an inaan shaqaalaha barno wax ku saabsan kahortagga dabka iyadoo la adeegsanayo isgaarsiin iyo tababar.

Sababta ugu badan ee dabka ka dhaliso goobta shaqada waa qalabka korontada. Dabka wuxuu ka bilaaban kara dhimbilo ama kuleyl ka yimaado:

- Xargaha ama fiilooyinka korontada ee waxyelloobay.
- Aaladaha korontada ee cilladaysan.
- Ilaha ama wareega korontada ee uu saaran yahay culeys koronto oo xad dhaaf ah.
- Xiriirada korontada ee dabacsan.
- Mashiinada iftiinka ama mashiinada korantada oo taabto dareere ololi kara.

Kahortag dabka ka kaco goobta shaqada adigoo hirgelinayo taxadarradan:

- Qalabka korontada ha lahaado masaafo banaan oo ah saddex fuud.
- Ku dadaal daryeelka guriga — ha u oggolaan in waraaqaha, kartoonada ama waxyaabaha guban kara ay ku dhex uruuraan guriga.
- Ilaha korontada ha saarin culeys xad dhaaf ah.
- Jooji isticmaalka wixii ah qalab koronto oo go'an, fiiqmay ama fiilooyinka ama xargaha waxyeelloobay.
- Si sax ah u bakhtii ilaha dabka oo dhan, sida taraqa lagu daaro shumaca, ka hor inta aadan tuurin.
- Isticmaalka kululeeyayaasha hawada lama oggola.
- Marnaba biyo ha ku tuurin dab koronto ah.

Cimilo Aad u Daran
Haddii uu dhaco qabow daran, gaar ahaan xilliga jiilaalka, wac khadka cimilada (1-800-945-1001) si aad u ogaatid xaaladaha cimilada ee saameeyo howlgalada ganacsiga.

Haddii ay dhacdo xaalado cimilo oo aad u daran, sida duufaanada, ufooyinka, iwm iyadoo ay shaqaaluhu joogaan shaqada, kooxaha Ilaalinta Hantida ayaa ogeysiin doona kormeerayaasha waxaana shaqaalaha laga filayaa inay raacaan habraaca badqab ee habboon.

Duufaano/Cimilo Aad u Daran
Haddii ay duufaan timaado ama cimilo aad u daran dhacaan, ogeysiis ayay qeybta Badbaadinta Hantidu ku bixin doontaa makarafoonka ama samaacada qof kasta maqlayo. Marka haddii la bixiyo ogeysiiska cimilada aad u daran, aad aaga loogu talagalay in gabaad looga galo cimilada aadka u daran, ama aag kale oo xiran kana fog daaqadaha u furan banaanka. Aaggag loo wareego markay jiraan cimilo aad u daran ayaa laga sameeyay DC-yada.

Dhul-gariiryada
Haddii dhul-gariir dhaco:

- Gabaad ka raadso albaabka ama aaggaga kale ee la xoojiyay.
- Iska ilaali inaad hoos istaagto daaqadaha saqafka, waxyaabaha laalaada, waxyaabaha lagu dhejiyay dhismaha, ama armaajooyinka.
- Gabaad ka raadso hoosta alaabta si adag u taagan, sida miisaska. Waxay ka ilaalin karaan walxaha ama qashinka soo dhacayo.
- Dhul-gariir kadib, ka taxaddar kana fogow fiilooyinka korantada ee hoos usoo dhacay oo sida ugu badbaado badan u aad goobta banaanka ah ee loogu talagalay in la iskugu yimaado.

VS&Co

VICTORIA'S SECRET & CO.

Waxaa la cusbooneysiiyay Sibteembar 2026